

**X. M. J. ee 15 Maars, lamba. 98.**

**Wakaalad Xilsaarashada Wasiirka Arrimaha Guud.**

### **MADAXWEYNAHA KU MEEL GAARKA**

Markuu arkay Qodobka 75, ee Dastuurka;

Markuu arkay Amargooyada 5 Abril 1954. lamba. 9, oo ku saabsan Nidaamka Shaqaalaha Rayidka;

Markuu arkay X. M (Xeerka Maamul) 18 Maajo 1956, lamba. 78 iyo wax-ka-beddellada ka dambeeyaa, oo ku saabsan Nidaamka Xukuumadda;

Markuu arkay X. M. 3 Disember 1956, lamba. 10, xagga qaar ka mida xilalka iyo awoodaha oo uu Madaxa Qaranka uu u wakiishay Wasiirka Arrimaha Guud;

Markuu garwaaqsaday in ay habboon tahay in Wasiirka Arrimaha Guud loo xilsaaro qaar ka mida xilalka iyo awoodaha oo hadda ah ikhtisaaska

Madaxweynaha Jamhuuriyadda;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Asaga oo ku saleynayo soojeedinta Wasiirka Arrimaha Guud;

### **WUXUU XEERINAYAA**

Marka laga bilaabo 1<sup>da</sup> Luulyo 1960, waxaa Wasiirka Arrimaha Guud loo wakiishay xilalka iyo awoodaha oo ay hadda Madaxweynaha Jamhuuriyadda siinayaan qodobbada 9, 10, 12, 15, 15, 17 iyo 31, ee Amargooyada 4-5-54, ee lamba. 9 oo la xiriirta:

- mushaharooyin iyo korosiimooyin xilliyeed;
- gunnooyin shakhsii loo leeyahay ahaan;
- ka-shaqayn xirfad badaxbannaan;
- shaqaale u-wareejin hayado kale;
- shaqo joojin sharciyeysan;
- saacada xafiiska iyo shaqo dheeraad ah;
- gunnooyin la siiyo shaqaalaha shaqada uga joogsanaya meeleyn laaan.

Xagga góaannada ku xusan qodobbada 9, 13 iyo 15, ee Amarggoyada kor lagu soo xigtay waxaa loo baahan yahay oo la dalbayaa in ka hor la helo ráyiga Guddiga Shaqaalaha.

Muqdisho, manta oo ah 15 Maars, 1961.

**Adan Cabdulle Cusmaan**

**Wasiirka Kowaad**

**Cabdirashiid Cali Sharmarke**

**Wasiirka Arrimaha Guud**

**Cusmaan Maxamuud Ibrahim**

Waa arkay waana diiwaageliyeey- Diiw. lamba. 5, Xaashi lamba. 192.

Muqdisho, 22 Maars, 1961.

Hanti-dhowraha: **Axmed Dahir**